

Bulshooyinka Qaaliga ah ee Dugsiyada Dadweynaha Milwaukee,

Qaybta koowaad ee sanad dugsiyeedka 2020-21 waxay noo dhaaftay si dhakhso badan mana ka marnayn caqabad. Xitaa iyada oo aan la kulanay dhammaan caqabadaha sanadka 2020 uu noo keeney, weli waxaa jira waxyaabo badan oo lagu mahadiyo oo ka jira Dugsiyada Dadweynaha ee Milwaukee.

Maadaama aan galeyno fasaxyada/nasashada munaasabada Mahadcelinta (Thanksgiving) iyo xilli ay ka buuxsantahay mahadnaq, waxaan rabaa inaan fursaddan uga faa'iideysto si aan u muujiyo sida aan ugu faraxsanahay inaan ka mid ahay bulshadeena cajiibka ah ee shaqaalaha, ardayda, iyo asxaabta. Intii lagu guda jirey waqtiyadan gaarka ah ee ugu adag, waxaan arkay shakhsiyad ka go'an oo aan daalin oo sameeyey dadaal dheeraad ah si ay u xaqiijiyaan in waxyaabo aan caadiga ahayn ay weli ku dhacaan ardaydeena iyo dhammaan dadyowga degmada.

Waxaa igu qalqaaliyey Gudiga Milwaukee ee Agaasimayaasha Dugsiga, macallimiinta, maamuleyaasha, iyo dhamaan shaqaalaha si aan u noqdo udoodayaasha ugu xoogan ee ardaydeena sanadkan iyo sanadkasta ka horeeyey. Waxaan u mahadcelinayaa waalidiinta, ayeeyooyinka/awooweyaasha, eedooyinka, adeerada iyo daryeelayaasha ila midka ah kuwaas oo si adag ugu shaqeynaya inay noqdaan qeyb muhiim ka ah guusha waxbarashada ilmahooda. Waxaan u mahadcelinayaa mutadawiciinteenna, deeq-bixiyeyaasha, iyo hawl-wadeenada kuwaas oo si xamaasad leh noogala shaqeeya fasalka dhexdiisa iyo dibadiisaba. Mida ugu muhiimsan, waxaan u mahadnaqayaa madaxdeenna mustaqbalka kuwaas oo sii wada inay iga farxiyaan!

Farxadan ka sakow, waxaan garwaaqsanahay in xilliga fasaxa/ciidaha uu soo kordhin karo shucuuro kala duwan. Tani waxay xusuusin u tahay inaad daryeesho naftaada iyo kuwa kugu xeeran maadaama dareenno kala duwan ay saameyn ku yeelan karaan niyaddaada/shucuurtaada.

Haddii qorshayaashaada fasaxa/ciidaha ay yihiin kuwa ka duwan xilliyadii hore ama dib loo dhigay sannadkan iyo haddii kalaba, waxaan adiga, qoyskaaga, ehelkaaga, iyo asxaabtaadu rajaynayaa inaad la kulantaan naxariis, deeqsinimo, iyo xusuus wanaagsan inta lagu jiro munaasabada Mahadcelinta (Thanksgiving).

Waxaan idinkaga mahadcelinayaa dhammaantiin, iyadoo aan loo eegin kaalinta aad ka geysateen, taageeradiina, dhiirrigelinta, iyo ereyada wanaagsan ee aad maalin walba ii soo dirtaan.

Dr. Keith P. Posley
Maamulaha Guud ee Dugsiyada

Qof Kasta Ayaa Munaasabada Thanksgiving Ka Dhigi Kara Mid Ammaan ah!

Xiro maaskaro

- Xiro maaskarad leh laba lakab ama in ka badan si aad u joojiso faafitaanka COVID-19.
- Maaskarada ku xiro sankaa iyo afkaaga oo ku xir garkaaga hoostiisa.
- Xaqiiji in maaskaradu si la eg ay ugu xiran tahay dhinacyada wejigaaga.

Ka fogow ugu yaraan 6 fuudh dadka kale

- Xusuusnow in dadka qaarkood oo aan lahayn astaamo ay faafin karaan cudurada COVID-19 ama ifilada.
- In laga fogaado 6 fuudh (qiyaastii 2 miitir) dadka kale waxay si gaar ah muhiim ugu tahay dadka halista sare ugu jira inay aad ula xanuunsadaan cudurka.

Dhaq gacmahaaga

- Gacmaha badanaa ku dhaq saabuun iyo biyo ugu yaraan 20 ilbidhiqsi.
- Wado daawada gacmaha lagu nadiifiyo oo isticmaal marka aadan awoodin inaad gacmaha iska dhaqdo.
- Isticmaal daawada gacmaha lagu nadiifiyo ee leh ugu yaraan 60% oo aalkolo ah.

Tixgeli Hawlaha kale ee Munaasabada Thanksgiving

Cuntada Munaasabada Thanksgiving ee Khadka tooska ah ku marti qaad asxaabta iyo qoyska ee aan kula noolayn.

- Qorsheey wakhti aad si wada jir ah khadka tooska ah ugu wadaagi kartaan cunno.
- Dadku ha wadaagaan cuntada sida loo kariyo oo ha tusaan dadka kale waxay ay kariyeen, labiskooda, ama cuntooyinka kale ee ay diyaariyeen.

Telefishan la daawo ama cayaaro la cayaar dadka guriga kula jooga

- Daawo bandhigyada Maalinta Munaasabada Thanksgiving, isboortis, iyo filimaan adigoo jooga guriga.
- Raadi ciyaar xiiso leh oo aad ku ciyaarto.

Dukaameysi

- Wax ku iibso khadka tooska ah maalinta xigta Munaasabada Thanksgiving iyo maalmaha ka horreeya fasaxyada/ciidaha qaboobaha.
- Isticmaal adeegyada aan taabashada lahayn si aad ugu iibsato wixii aad u baahan tahay, sida waxyaabaha wadooyinka dhinaceeda lagu gado.
- Ka adeego suuqyada hawada furan adigoo 6 fuudh ka fogaanaya dadka kale.

Hawlaha Kale

- Diyaari cunnooyinka dhaqanka una gee qoyska iyo deriska qaab aan ku lug lahayn taabashada dadka kale (tusaale ahaan, ugu dhaaf albaabka/guriga hortiisa).
- Kaqeybqaado hawlaha mahadnaqa, tusaale ahaan adigoo qoraya waxyaabaha aad ku mahadnaqeyso lana wadaag asxaabtaada iyo qoyskaaga.

Kheyraad: [Dabaaldegidda Munaasabada Thanksgiving, Xarumaha Xakamaynta iyo Kahortagga Cudurrada](#)

Milwaukee Public Schools
Office of the Superintendent
5225 W. Vliet Street
Milwaukee, WI 53208
(414) 475-8001 • mpsmke.com

mps.milwaukee.k12.wi.us